
@SOMALIBOOKS

Simikaarkii Najma



Mustafa Atam

Copyright © 2018 Mustafa Atam
www.Naadigacuris.com
All rights reserved

Telegram @SOMALIBOOKS

Oktoobar, 2018
Jigjiga, Itoobiya

Telegram @SOMALIBOOKS

Mahadin

Eebbe ayaa mahad leh, Muxammad baa sharaf leh.

Waxaan mahad ballaadhan u celinayaa dhammaan jaallayaashii buug-yarahan igala qeyb qaatay, kuwaasi oo wax badan iga taakuleeyay. Si gaar ah waxaan ugu mahad celinayaa jaallahay Axmednuur Marayare oo iga kaalmeeyay tifatiridda iyo qurxinta qoraalkan iyo Muxammad-Amiin oo iga caawiyay naqshadeynta jaldiga iyo habeynta buug-yarahan.

Telegram @SOMALIBOOKS

Qolkii aan guriga ka degganaa ayaan imid. Deg-deg intaan albaabka usoo xirtay ayaan is duuduubay. Markan oo kale hurdo iima imaan karto: Murugo, xanuun, dhaawac qalbiga ah, wareer, madax-xanuun, oohin, niyad-jab, walaac iyo isku buuq ayaa nafteyda la soo darsay. Si dhab ah uma suurayn karo xilligaas wixii aan ku sugnaa. Dhinaca midig ayaan furaashka ugu jiifaa. Illinta ishayda bidix kasoo burqata ayaa waddo ka sameysatay rakada sanqada ah ee sanka dushiisa ah, waxayna markay isha midig gaadho ku darsamaysay tog kale oo isha midig kasoo burqaday; markaas bay sidaas ku noqonayeen wabi dhaawac iyo xanuun ah oo kasoo butaacay labada wax lagu bidhaansado.

Waa markii koowaad ee noloshayda aan darteed u ilmeeyo gabadh aan xiriir la wadaagay! Xanuun badanaa marka aad qof jeceshahay ee isaguna uu kugu dheel-dheelo. Xumaa marka aad si dhab ah wax u gaclooto, haddana aanu qofkaad jeclayd kula wadaageyn dareenkaas. Waxa kaliya ee aan haatan awoodo ayaa ah 'inaan qolkeyga cidlada ah ka dhex ooyo'. Waxaan iswaydiiyaa: "waa maxay sababta aad gabadhan sidan oo dhan ugu jeclaatay?" Waxaa amakaag ah gabadh aanan weligay muuqeeda arkin inaan sidaas oo dhan u jeclaado.

Waxaan maqli jiray "Balaayo intay kaa maqantahay qeyrkaa ayay ku maqantahay". Sidaas si la mid ahna, "Hagardaamada caashaqu inta ay adiga kaa maqantahay waxay ku maqantahay qof kale". Ninba waa maalintiisa'e,

Telegram @SOMALIBOOKS

anigana maanta ayaa la ii hilay. Maanta ayaan dhimbiilihii caashaqa dhamacdooda kulaalayaa! Maanta ayaan qool ugu jiraa kalgaceyl aan u qaaday gabadh buugga naxariista isku laabtay. Maanta ayaan maxbuus u noqday militarigii jaceylka!

Waa markii koowaad ee uu jacayl heerkaas gaadhsiisan igu dhaco. Waana markii ugu horraysay ee aan ka koro xiisaha sida xoorka gudha. Waxaan garwaaqsaday kani inuu yahay jaceylkii dhabta ahaa. Jalkii iyo dheeftii ayaan ka soomay. Soon aan la igu lahayn. Qoyskii, qaraabadii iyo xidhiidhinta asxaabtii aan jeclaa ayaan sida dheefta oo kale uga go'ay. Waa dhab illeyn jaceylku dadka inuu dheefta ka jaro. Waa dhab illeyn in hadimada caashaqu kaa dhigto dammane aan dunida oo dhan dan ka laheyn.

Taleefankeeda ayaan wacaa, hase yeeshee kama jawaabto wicitaankeyga. Mar kale ayaan wacaa, sidii hore si la mid ah ayay yeeshaa. Mudo ayaan wicitaanka ku cel-celiyaa, balse waxaad ba mooddaa inay ku raaxeysanayso taleefanka ay igu daminayso. Caku, ciil badanaa! Qof aanaan isir iyo ehel toona wadaagin ayaan u ooyayaa, iyaduna dan iyo muraad igama lahan! Haddeer dan igama lahan, illowse way i jeclaan jirtay. Xilli tagay ayay ka dhigtay xasuusteennii hore. Xubbigii iyo kalgacalkii hore ee ay ii qabtay daadka ayay raacisay, laakiin aniga ayay xajiintii igu reebtay. Waxaan noqday ruux qalbigiisii daad la tagay qalfoofkiisiina daad-xoorta yaallo!

Telegram @SOMALIBOOKS

Qofta sidan oo dhan ii dayacaysaa waa tii u oomi jirtay codkeyga, kolkii aanan saacad ama saacado kooban la hadlin. Waa isla qoftii aanu hadh iyo habeen isku habi jirnay heesaha caashaqa.

"Sunnay aniga ii tahay
Subaxii inaan tago
Seerahaan ka soo guray
Ubaxaan ku saaree"

Waa qoftii i bartay habka wax loo jeclaado. Waa macallinkaygii igu ababisay beer nugeelka iyo naxariista. Waa qoftii aan ka helay sheekadeeda ee iyaduna ii heellanayd. Waa qoftii aan isu han weynayn. Waa qoftii aan darteed u dhafray habeenno badan. Waa qoftii ii aheyd wax walba. Waa qoftii aan iyada darteed u daayay hablaha oo dhan.

Wax aan gu' kaliya ka badneyn ayaa kasoo wareegtay markii aannu billownay xiriirka jacaylkeenan. Si dhib yar ayaannu dhidibbada ugu aasnay xiriir qotodheer oo xasuuso badan nagu reebay. Degmadayda ayaan ka imid aniga oo aafada jacaylka ka nabad qaba. Mar kasta oo dugsiga la fasaxo, dhammaadka gu'ga, waxaa caado ii ahaan jirtay inaan Somaalilaan(Hargaysa) tago si aan u hawo gedisto. Habo ayaa deggan Hargeysa, annagu waxaannu degganahay Degmo ka tirsan Dowlad Deegaanka Soomaalida[Kilil 5]. Marka uu fasaxu ii dhammaado ayaan ku laabtaa degmadeyda si aan

Telegram @SOMALIBOOKS

nolosheyda caadiga ah usii wato.

Sannadkan, isla kolkii aan Hargaysa imid ayaan la hadlay gabadh uu dhalay adeerkay si ay simikaar iigu soo dirto. Gabadhu kolkaas waxey degganayd magaalada Burco oo ay dhawaan uun ku aroos gashay. Codsigii aan u dirsaday ayay si fudud uga soo jawaabtay, waxeyna durba iisoo dhiibtay simikaar shirkadda Somtel ah. Maalmo markii aan simikaarka isticmaalay, ayay gabadh kale isoo wacday. Waa noole aad u cod macaan oo ay naftaydu jeclaysatay dhegaysiga sawtkeeda.

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxa taas kasii yaab badnaa, markii ay ii sheegtay inay simkaarkan iyadu leedahay oo ay si deg'deg ah u rabto! Waxaa na dhex martay sheeko u dhacday sida tan:

-Asc Walaalo. See tahay?
-Wcs walaal, waan fiicanahay?
-Simikaarka aniga ayaa leh ee ii keen walaalo.
-Walaal simkaarka ma lihid ee xaggeed ku yeelatay?
-Aniga ayaa iska leh oo soo furtay walaalo.
-Haye, xaggeed joogtaa adigu?
-Burco.

Yaab iyo anfariir! Waxaan warka ugu soo koobay una sheegay inaan simikaarka siin doono. Haye iyo warsan ayaannu isku maca salaamaynay.

Inyar markii ay kasoo wareegtay ayay hibasho igu

dhalatay. Gabadha codkeedii ayaa niyaddeyda kusoo noq-noqday. Codkaasi wuu iga dhex baxay! Cod yar oo ay maanta maqalkiisa iigu horayso ayaa maskaxdeyda rabshay. Markii aan ka nasan waayay ayaan taleefanka ku celiyay.

-Asc Walaalo.
-Wcs Walaalo.
-Walaal Simkaarka waan kuusoo dirayaa haddii Eebbe idmo. Waxaad tahay gabadh wanaagsan oo cod macaan, sidoo kalena si asluub leh ayaad iila hadashay. Simikaarkaaga waan ku siin doonaa laakiin walaal waxaan rabaa inaynu isbarano sidoo kalena aynu wada hadalno haddii ay suurta gasho. Waxay tidhi: "dhibaato malahan."

Markan codkeedu wuxuu igu beeray naxariis iyo xasilooni. Wax aad neecow qabow mooddo ayaa i saaqday. Dhegta ayaa ku raaxeysanaysa codkeeda, maskaxduna waxaad mooddaa inay ku miyirsanayso. Wadnaha garaaciisa ayaa laba jibbaarmay. Wax ku dhacay ma aqaano e, malahayga, hoormoono jacaylka loogu talo galay ayaa dareen wadayaashayda gilgilay!!!

Najma si wanaagsan ayay maalintaas iila hadashay, laakiin marnaba meesha ma aanan soo dhigan inaan dareen baaxadaas leh u qaadi doono. Iyada ma aanan weli arag, hase yeeshee, codkeeda iyo sida ay iigu sheekayso ayaa igu kallifay inaad sawirto muuqeeda. Waxaan

Telegram @SOMALIBOOKS

sawirtaa Najma qalbigayga ku dhex nool-waa najma aniga ii khaas ah. Ma aqaanno farshaxamiistaha suuraddaas maskaxdeyda ku xardhay, laakiin waxaan aaminsanahay in wax aanan anigu arkin uu sawirkaas maskaxdeyda ku beeray. Sida ay ii saameysay marka aan muddo ka fekero ayaan tix gaaban u qoraa:-

Maskaxdaad Qol idil iyo
Qasri weyn ku leedahay

Wadnahaad Qafaashood
Quful adag ku xidhataa

Qalbigaad Badh leedahay
Maankaad ku Qorantahay

Codkeeda ayaan nafta jal uga dhigaa. Saacad haddii aanan iyada la hadal ma qummani. Iyada lafteedu ilbidhiqsi kasta inaan la hadlo ayay jeceshahay. Annaga oo aana kulmin ayaannu bilo sheekaysan jirnay. Waxaannu isku qaadnay dareen jaceyl oo aan la qiyaasi karin. Haa. Halbeeg lagu cabbiro male. Waxaannu u kaftannaa sidii laba weligood is yaqaannay, waxaannu u sheekaysanaa sidii laba is hor fadhiya, waxaannu iskula faraxnaa sidii laba weligood wada joogi doona.

Muuqeeda maan arag
Midabkeeda maan baran

Telegram @SOMALIBOOKS

Nafta muhashadeediyo
Muxibbada Qalbiga taal
Mugga baaxad ay tahay
Male kuma astayn karo!

Shakhsiyan waxaan ku qiyaasay inay tahay gabadh da' yar oo dhallinyaro ah. Hadalkeeda, hab fikirkeeda iyo sida aannu isku fahamnay ayaa markhaati ka noqonaya da'da ay jirto. Maalmo kooban markii aannnu inantii wada hadlaynay ayuu xidhiidhkeennu xoogaystay. Waannu is dhex galnay. Labadeennuba waxaannu iska wareysannay nolosha iyo taariikh nololeedkeenna. Aad baannu iskugu qanacnay; habka aannu u wada sheekaysanno, waannu isu bognay. Maalinba maalinta ka danbaysa ayuu xidhiidhkaan hawada ku laheyn sii kobcayay.

Maalintii aannu iyada isbaranay markii ay usbuuc kasoo wareegtay ayaan wacay gabadhii adeerkay dhalay ee simikaarka iisoo dirtay. Waxaan uga war bixiyay simikaarka ay i siisay iyo sida la iigu qabsaday. Markii aan u sheegay inay gabadh isoo wacayso simikaarkana iga rabto ayay iigu jawaabtay: "inaadeer waa gabadh qurux badan ee maad iskaga qabsatid." Yaa? "Waar ku qabso ku qadi mahayside, dhooreyahow."

Aniguna gabadha mar horeba waan ku qabsaday laakiin iyada[ina-adeertay] uma aanan sheegin inaannu gabadha xidhiidh bilownay. Intaan hadalkeeda dhageystay ayaan

Telegram @SOMALIBOOKS

ugu war celiyay: "Waayahay. Waan ku qabsanayaa."

Sidii ayaannu gabadhii muddo u wada xidhiidhi jirnay. Xiisaha aannu isku qabno ayaa sii siyaaday. Dhinaca kale fasaxaygii dugsiga ayaa aad usoo dhawaaday. Haddii aan degmadaydii ku laabto, jaceylkayga[Najma] masoo wada hadli doono, sababtoo ah xilligaas degmadaydu ma aysan laheyn adeegga khadka taleefanka gacanta.

Haddii aan Hargaysa ka tago waxaan noqon doonaa dhagool aan cidna la hadal. Dhinac waxaan ahay arday oo kama joogi karo inaan waxbarashadeyda sii wato, dhinac kalena kama joogi karo xiisaha Najma ee i gubaya. Arrintaydu waa laba daran mid dooro-Inaan waxbarashada joojiyo si aan Najma ulasii hadlo iyo inaan Najma codkeeda ka qado si aan waxbarashada usii wato.

Waa go'aan aad iigu adkaa laakiin tan danbe ayaan qaatay. Aayaheyga inaan dhiso oo aan waxbarashadeyda sii wato waan jeclahay, sidoo kalena qorshaha dhisitaanka aayaheyga ayay Najma kaalmaha ugu horreeya kaga jirtaa. Caqabad weyn ayaa ila soo daristay.

Laba bilood ayaa kasoo wareegtay maalintii aannu Najma hawada iska baranay. Fasaxaygii iskoolkana waxaa ka hadhsan bil kaliya. Bishaas wixii ka danbeeya waa inaan hawada ka baxaa. Maxaa se dhici doona!? Su'aashan marka aan is weydiiyo ayaan cabbaar fikiraa. Jawaab waafi ah oo aan karka maskaxda ku qaboojiyo ayaan

Telegram @SOMALIBOOKS

waayaa. Welwelka ayaa igu sii bata. Riyooyin naxdin leh ayaan la kulmaa-Anoo Najma waayay, iyadoo la guursaday, i.w.m.

Waxaan is bar-bar dhigaa labadayda nololood-Nolol Najma la'aan ah iyo nolol Najma leh. Macaan badanaa noloshayda ay Najma ku jirto. Waa nolol farxad, reyn-reyn iyo degganaan leh. Waa nolol xallad iyo xamaasad leh. Nolosha aysan ku jirin na waa nolol mugdi ah oo murug iyo niyad-jab wehel la ah.

Xiisaha aannu Najma isku qabno xadhkaha ayuu goostay oo xadka ayuu dhaafay. Taleefanka aan qabsado marka uu gabbalku dhaco waxaan dhigi jiray waagu kolka uu beryo. Ma aanu kala daali jirin. Maalintiina saacad'saacad ayaannu u wada xidhiidhi jirnay. Kolka ay dugsiga aaddo, kolka ay guriga joogto, kolka ay cunto sameynayso, iyo kol kastaba iyada waxaa madadaalo u ahaa codkayga. Aniguna maadaama aanan shaqo kale haynin ba waxaan ku raaxeysan jiray sheekadeeda.

Sakhradda jaceylkeeda ayaa maalin ba maalinta ka danbaysa si tartiib ah jidhkayga ugu fidaysay. Haatan daroogo kale oo aan balwad ka dhigto uma baahni, sababtoo ah balwaddaydu waa iyada[Najma]. Xilligaas waxaan aaminsanaa haddii mid kamida xididadayda dhiigga la jeexo in loogu tagi lahaa "Najma" oo dhex jiifta.

Telegram @SOMALIBOOKS

Wakhtigaas qof ahaan ma aanan aqoonin aaladda Facebook. Dadka badankiisa ayaan kala mid ahaa arrintaas. Facebook waxaa adeegsigiisa yaqaannay dad kooban, sidoo kale xiiso badan looma hayn maadaama aan aad loo adeegsan jirin. Sidaa darteed, waa ay adkeyd in aannu kala helno sawirro. Ma jirto boosto[Post Office] aannu sawirro isugu diri karno. Habka kaliya ee aannu sawirro ku kala heli karno ayaa ahaa in aannu baabuurta Burco iyo Hargeysa isaga kala goosha u dhiibno alaabta aanu isku diraynno..

Najma ayaan ka wada hadalnay sidii aannu sawirrada ku kala heli laheyn. Waxaannu isku waafaqnay in aannu baabuurta ama dadka rakaabka ah u dhiibno sawirrada iyo alaabaha kale ee aannu isku diraynno.

Nasiib wanaag, waxaa isla maalintaas magaalada Burco safar shaqo u aadaya wiil Sacad la dhaho, oo aannu qaraabo nahay hay'adna u shaqeeya. Si deg-deg ah ayaan u baxay, waxaan tagay suuqa si aan uga soo gado hadyado khaas ah oo aan Najma ugu talo galay. Sida caadada ahna, waxaan ku xidhay kaadoo qurux badan. Waxaa kale oo aan hadyadda raaciyay sawirkayga iyo buug yar oo kooban[Note Book]. Buuggaas waxaan qorayay mudo toddoba maalmood ah. Buugga waxa ku qoran qoraallo jaceyl ah, geeraaro, sawirro farshaxamaysan oo ka kooban wadne iyo waxyaabo kale.

Alaabtii waxaan u dhiibay wiilkii, kadibna waxaannu

Telegram @SOMALIBOOKS

isku raacnay istaanka baabuurta. Waan sugayay ilaa iyo intii baabuurka laga rakaabiyay oo uu ka dhaqaaqayay. Waan maca salaameeyay sidoo kalena waxaan kula dardaarmay inuu alaabtaas ilaaliyo sida ay tahayna u gaadhsiiyo boqoradda uu qalbigaygu calanka sudhay.

Najma oo sii ogeyd inaan sawir iyo hadyad ba usoo diray ayay alaabtii gaadhay. Waxay ii sheegtay inay isla wiilkaas iigusoo dhiibi doonto sawirkeeda. Nasiibxumo, wiilkii ayaa raagay. Safarkiisii shaqo ayaa qaatay muddo ka badan intii aan filayay. Intaas ka badan ma sugi karo, sababtoo ah diiwaan-galinta dugsiga ayaa la bilaabay. Bes, wakhtigaygii fasaxa baa soo idlaaday.

Waa inaan usbuucan sida ugu dhakhsaha badan uga amba baxaa magaalada Hargaysa. Waxaan haystaa maalmo kooban oo kaliya. Haddii uu maalmahaas Sacad ku yimaado, waa ii farxad. Balse haddii uu maalmahaas ku iman waayo waa ii murugo. Waxaan degmadayda ku laaban doonaa aniga oo aan sawirka Najma arag.

Ta danbe ayaa run noqotay. Sawirkeeda aniga oo aan arkin ayaan degmadayda ku noqday. Aniga oo saaran gaadhigii degmadayda u anba baxayay ayuu isoo wacay wiilkii[Sacad]. Wuxuu ii sheegay inuu Burco kasoo baxay. Mar waan ku farxay inuu soo socdo, mar kalena waan ka naxay sababtoo ah isla saacaddaas ayaan magaalada Hargaysa ka baxayaa.

Telegram @SOMALIBOOKS

Xiisaha aan u qabo inaan sawirkeeda arko wuxuu igu kallifay inaan saacad gudaheed toban jeer waco wiilkii sawirkeeda waday. Halkeed soo maraysaa? Berbera ma soo gaadhay? Goorma ayaad Hargaysa soo galaysaa? Iyo Su'aalo kale oo aan jiho laheyn ayaan wiilkii ku wareeriyay.

Mar baan go'aansan gaadhay inaan gaadhiga iskaga hadho si aan sawirkeeda oo qudha u arko; haddana waxaan is idhi hooyo ayaa kaa xumaan doonta maadaama oo aannu isku ogeyn inaan maanta oo Axad ah Hargaysa kasoo baxo. Waxaa la gaadhay xilligii uu gaadhigu u amba bixi lahaa degmadayda. Ma ka hadhaa!? Maya ee iska fuushanow! Ugu danbeyn waxaan go'aansaday inaan tago laakiin saaxiib aanu isku degmo nahay oo saddex maalin kadib soo tagi doona ayaan ku ballamiyay inuu sawirkaas wiilka iiga soo qaado iiguna keeno degmada.

Laga bilaabo markii uu gaadhigu Hargaysa kasoo baxay ilaa iyo intii aan ka baxayay xadka uu ka shaqeeyo khadka taleefanku waxaan dhegta ku hayay taleefanka. Waxaan la hadlayay Cod-dahabtii maqalkayga qandaraasatay. Si heesare ah ayaannu isku maca salaamaynay aniga oo u sheegay xilliga aan soo noqon doono iyo weliba inaan rajeynayo inaan la kulmo haddii Eebe idmo.

Sidii aan horayba u sheegay degmadayda kama shaqeeyo adeegga khadka taleefanku. Waxaa ii billaabmaya

Telegram @SOMALIBOOKS

maalmihii welwelka, maalmihii cabsida, maalmihii fikirka, maalmihii boholyowga iyo xiisaha. Habeen markii aan degmadayda joogay aniga oo aan dugsigii is diiwaan galinin ayaan go'aansaday inaan Hargaysa ku laabto. Waxaan sugi la'yahay inaan Najma sawirkeeda arko oo aan laabta gashado. Xataa waxaan ku kalsoonaan waayay wiilkii aan isku ogeyn inuu sawirka degmada iigu keeno. Bal kawaran haddii uu raago!? Bal kawarran haddii uu ka lumo!?

Xilligii uu wiilku hargaysa kasoo bixi lahaa waxaa ka hadhay 36 saacadood. 36 saacadood iyo weliba ku dhawaad 12 saacadood oo uu dhexda kusoo jiri doono waa 48 saacadood! 48 saacadood oo dhan? Waa wakhti dheer! Ma sugi karo runtii! Maxaan sameeyaa? Waa inaan isla gaadhigii aan xalay soo raacay oo galabta bixi doona raacaa. Waa inaan isla caawa Hargaysa galo, berri salaadda subaxna aan sawirka Najma ku indha kuusho.

Ujeedada aan hargaysa ugu laabanayo ayaa ah laba arimood:
1. Inaan arko sawirka Najma.
2. Inaan maqlo codka Najma.

Kahor inta aanan arkin sawirka Najma, waxaa maskaxdeyda ku xardhan suuradda Najma oo aad u qurux badan. Waa suurad aanan anigu aqoonin cidda ku xaradhay maskaxdeyda. Laakiin marnaba meesha masoo dhiganin in sawirka Najma uu ka duwanaan doono kan

Telegram @SOMALIBOOKS

maskaxdeyda ku xardhan! Isma aanan waydiin maxaad sameyn doontaa haddii ay Najma noqon waydo tan aad suuraysatay? Isma aanan waydiin wixii aan sameyn lahaa haddii Najmada dhabta ah ee muuqeeda aan arki doonaa aysan dookhayga aheyn!

Hooyo ayaan u sheegay inaan Hargaysa ku laaban doono. Aad ayay arrintaas ula yaabtay, iimana aysan oggolaan inaan baxo. Muran dheer kadib, waxaan hooyo ku qanciyay inaan alaab kusoo ilaaway Hargeysa. Waxay ii sheegtay in alaabtaas si fudud la iigusoo qaadi doono oo ay iyadu cid kale farriin sii fari doonto. Arrintaas waan ka biyo diiday. Waxaan ku qanciyay inay tahay alaab dad kale igaga xidhan oo cid aan aniga aheyni aysan soo qaadi karin. Ugu danbeyn si qasab u eek ayay hooyo tagitaankayga ku oggolaatay.

Durba waxaan iska dareemayaa inaan si xad-dhaaf ah ugu xiisay codkii Najma ee aan habeen kasta ku wardin jiray. Hal habeen ayaanan codkeeda maqal wuxuuna habeenkaasi iiga dhignaa bilo. Saddexdii bilood ee lasoo dhaafay balwaddii aan qabatimay ayaan maanta tabayaa. Sakhraddii jaceylka ayaa igusoo kacday. Codkeedii daroogada ii noqday ayaan u jeelanahay.

Waxaan u diyaar garoobay inaan mar kale maanta Hargaysa u baxo. Bal maxaan habeen hore isaga joogi waayay haddii ba aan maanta ku laabanayo? Mooji!! Waxaan is idhi laba boglayntani waa mid kamida

Telegram @SOMALIBOOKS

astaamasha jaceylka. Marka uu jaceyl awood badan leh ku hayo, isma ogid ficillada aad ku dhaqaaqayso. Tani waa sababta dadka wax jecel qaarkood ay u sameeyaan go'aano aan laga fiirsanin.

Safarkaygii labaad ayaan gudo galay mudo 48 saacadood gudahood ah. Dhinaca Hargaysa ayuu gaadhigii u jeestay. Laydhii xiisaha Najma ayaa iiga soo carfaysa jihada waqooyi. Wadadu waa ay dheertahay ; weliba waa ay sii laba jibaarantaa kolka aad tabayso cod-dahab Najma oo kale ah. Habeenkii oo dhan gaadhigu wuu guuraynayaa.

Dadka qaar ayaa gaadhiga ku dul gam'a. Anigu se badweyn kale ayaan dhex dabaalanayaa. Hirarka muxubbada ayaa i jiita. Markaan cabbaar ku hafto ayaan soo miyirsadaa. Haddana mawjado kale oo xasuus ah ayaan galaa. Sheekooyinkeedii ayay maskaxdu soo kala quftaa sidii qaamuus aan cilmi ka baadhanayo. Bog ba bogga kale wuu ka xiiso badanyahay. Kama daalo inaan baal kasta oo qaamuuskan ka mid ah ku nasto. Mar kaliya ayaan dhoola caddeeyaa. Aniga oo dhoola caddeynaya ayaan ku nastaa bog kamida buuggan. Qosolkeedii johoradda ahaa ayaan dul istaagaa, kaddibna mar kaliya ayaan anna qoslaa. Waxaan mar kale soo miyirsadaa iyaga oo labadii i garab fadhiyay ay igu maadsanayaan. Waxay igula kaftamaan inaan gam'ay oo aan qarway[hurdo iskula hadlay]. Igama qasna. Hawshayda ayaan iska wataa, dirawalkuna shookaantiisa ayuu iska wataa.

Telegram @SOMALIBOOKS

Daakiraadda subaxa ayaannu magaalada Hargaysa soo galnay. Masaajid sayladda Hargaysa ku dhow, oo xaafadda Qudhac-dheer ku yaalla ayaan faralkii subaxa iskaga riday kadibna waan jarmaaday. Waxaan wacay saaxiibkaygii aannu isku degmada aheyn ee aan kula ballamay inuu sawirka iisoo qaadi doono. Wicitaankeyga kama uusan jawaabin. Malaheyga wuu hurdaa oo weli ma uusan toosin.

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxaan aaday xaafaddii uu wiilku la degganaa[joogi jiray]. Waxay la amakaageen sababta aan xilligaas u socdo. Gabadh markaas uun toostay oo quraacda sameynaysay ayaa si naxsan ii waydiisay: "Samatar, ma gaadhigii ayaa dhexda idinkaga jabay?" Gabadhani way ogeyd inaan shalay mooyee dorraad magaalada ka baxay. Waxaan ugu war celiyay: "Maya walaal. Degmadii ayaan shalay subaxdii galay, shalay casarkiina waan kasoo baxay". "Sabab?" Ayay mar kale lasoo boodday. "Alaabo muhiim ah oo Burco la iiga keenay ayaan ka tagay", ayaan aniguna warka ugu soo koobay. "Qolka fadhiiso aad quraacatide" ayay si deggan iigu qaboojisay.

Waxaan galay qolka. Waxaa jiifa wiilkii aan rabay ee sawirka Najma hayay. Si deg-deg ah ayaan u toosiyay waxaana waydiiyay, "Aadam, walaal sawirkii ma haysaa mise wiilkii kama aadan soo qaadin?". "Wiilkii ayaan xalay kasoo qaaday" ayuu igu jalbeebay. Anoo hiyi kacsan ayaan fadhiistay, dhakhso usoo saar ayaan ku

amray.

Markiiba intuu kacay oo qol kale galay ayuu alaab buuran oo bac ku jirta soo qaaday. Intii aanu iisoo fidinin ayaan anigu gacantiisa laacay kaddibna aan ka dhuftay alaab kaadoo ku xidhan oo bac ku jirta. Si dhakhso ah ayaan u furay. Hadiyadaha kale kuma aana mashquulin ee sawirka ayaan isla markiiba bar tilmaameedsaday. Intii aan sawirka raadinayay waxaan dhulka kusoo daadiyay alaabo yar-yar oo ay mid ahaayeen shukulaato, ubax, qalin iyo buug-yare[Note book].

Xoogaa kaddibna waxaan helay sawirkii aan aragiisa ugasoo baqoolay boqolaal Kiiloo Mitir. Indhaha ayaan ka bogtay. Cajaa'ib!! Wax aanan filayn ayaa iiga soo baxay. Naxdin iyo argagax ayay igu noqotay.

Marnaba ma aanan fileynin inuu sawirkani yahay kii Najma. Dhowr goor ayaan fiirinta sawirka ku noqday bal inay run tahay iyo inkale. Wuu ii cuntami waayay. Waan ka niyad-jabay. Waxaa is-yeelan waayay sawirka aan[iyada] ka haystay iyo kan ay iisoo dirtay. Ma anaa waalan mise Cadan baa laga heesayaa!! Toddobaatan goor ayaan sawirkii hubiyay. Ma dhab baa mise waa dhalanteed? Ma Najmaa mise waa indhaheyga? Rabbi Yasir!

Mar kaliya ayuu xiisahaygii noqday xoor gudhay. Qoftii aan codkeeda u oomanaa ayaan mar kaliya hiifay. Iyada

Telegram @SOMALIBOOKS

ma necbi; hadalkeeda, codkeeda, hab dhaqankeeda, dabeecadeeda iyo shakhsiyadeeda intuba way i cajab galiyeen. Laakiin suuradeeda ayaa wax walba bedeshay. Culeys boqol kiiloo garaam dhan ayaa i saarmay. Waxaan is moodayaa nin xammaal ah oo toban kiish oo sonkor ah tunka ku wada ama dhowr kiish oo sibidh ah. Mooji! Malaha jaceylkayga ayaa kiish sibidh ah ka cuslaa! Reer xamarka ayaa ku maah-maaha "Dad iyo duur ba wax aanad ka fileyn ayaa kasoo baxa". Maanta Najma sawir aanan ka fileyn ayaa kasoo baxay.

Sawirka aan arkay ma aheyn mid foolxun, laakiin kan kale ee maskaxdeyda ku xardhan ayaa ashqaraar kale ah. Marka la is barbar dhigo waa kaaf iyo kala dheeri. Amateedkii aan iyada u hayay ayaa wiiqmay. Sidaas ay tahay ma rabo inaan iyada dareensiiyo inaan sawirkeeda hiifay.

Waan wacay. Sidii wanaagsaneyd ee aan ula hadli jiray ayaan ula hadlay. Ma doonayo inaan iyada qalbiga ka jabiyo. Waxaan ku idhi, "Walaal magaaladii waan imid. Wax kalena uma aanan iman ee sawirkaaga dartiis ayaan usoo noqday. Al-xaasil hadda ayaan sawirkaagii gacanta ku dhigay. Masha allaah! Gabadh aad u qurux badan ayaad tahay, sawirkaaguna wuu i cajab galiyay".

Laba maalmood ayaan Hargaysa dib usii joogay. Labadii maalmood waxay iga arki wayday xiisihii badnaa ee aan u hayn jiray. Xidhiidhkii badnaa iyo taleefankii badnaa

Telegram @SOMALIBOOKS

ayaan yareeyay, sababtoo ah xiisihii aan u qabay ayaa aad u yaraaday. Maalmahaas waxaan go'aansaday inaan gabadhaas xiriirkeeda halkaas kusoo af-jaro.

Degmadaydii ayaan iskaga laabtay aniga oo u muuqda mid ku guulddareystay jaceylkii fogaanta badnaa. Waxbarashadaydii ayaan halkii ka sii watay. Sannad-dugsiyeedku wuxuu ka koobanyahay laba kal[two terms]. Kalka koowaad oo afar bilood ah iyo kalka labaad oo afar bilood ah. Labada kal dhexdooda waxaa jira fasax yar oo bil ah. Afar bilood kdadib, fasixii yaraa ayaan ku laabtay Hargaysa.

Gabadhii ayaan dib u wacay waanna la xidhiidhay; Xidhiidh aan rasmi aheyn. Si goos-goos ah ayaan u wici jiray. Waan salaami jiray balse sheekooyin sidaas usii dhaadheer ma aanaan yeelanin. Waxay iga dareentay in aanan sidii hore aheyn. Waxay in badan i waydiisay waxa is beddelay. Iyada jacaylkeedii weli isma uuna dhimin. Sidii ay iisoo wici jirtay ayay iisoo wacdaa. Marka ay su'aalo arrintan ku saabsan i waydiiso jawaabo macquul ah ma siiyo. Markuu fasixii ii dhamaaday ayaan degmadaydii ku laabtay. Kalkii labaad ee sannad-dugsiyeedka ayaan galay.

Maalin maalmaha kamid ah ayaan yara fikiray. Waxaa qalbigayga kusoo dhacday Najma. Niyadda ayaan iska idhi, "waxaa laga yaabaa in sawirka ama kaamerada wax ka khaldanaayeen oo ay gabadhu sidaas ka qurux badan

Telegram @SOMALIBOOKS

tahay". Arrintaas ayaa igu dhalisay dareen. Waxaa mar kaliya fufay boogihii jaceylka ee aan muddada dhayi jiray. Si hor leh ayuu caashaqu iigu soo laba kacleeyay.

Kalkii labaad markuu ii dhammaaday ayaan fasixii waynaa galay. Xaggaa iyo Hargaysa ayaan sidii caadada ii aheyd u safray. Waxaan socdaalay aniga oo aad ugu xiiso qaba inaan Najma mar uun la hadlo. Waxaan qabaa rajo ah in waxa aan arkay uu ahaa sawir balse Najmada dhabta ah ay sidaas ka duwanaan karto. Waxaan naawilayaa in wax walba ay u dhici doonaan sida aan anigu suuraystay.

Wax aanan qorshaha ku darsan ayaan kala kulmay. Saadaashaydii wacneyd waan ku hungoobay. Sidii aan anigu isku beddelay ayay iyaduna isku beddeshay.

Maxaa loo dhahaa dumarku waa aadame aad u naxariis badan? Maxay iigu beer jileeci wayday aniga? Maanta ayaan Cilmi Boodhari oo kale noqday. Mararka qaar waxaan is dhahaa jaceyl doqon ah ayaa ku helay. Oo ma jaceylka Burco iga jooga ayaa fariid ah? Haa, gabadhu waa fariid ee jaceylka ayaa doqon ah.

Markii ay ogaatay inaan aad ugu baahnahay ayay iga gaabsatay. Waxey billowday inay iga aarsato. Anigu si hoose ayaan uga gaabsaday, laakiin iyada teedu waa badheedh. Anigu inaan hiifay ficil ma aanan ku

Telegram @SOMALIBOOKS

dareensiin laakiin iyadu ficil bay iigu muujisaa. Dhib badanaa marka aad daba ordayso qof ku fogeynaya. Jaceylku adiga oo xoog badan ayuu kaa dhigaa mid tabar daran. Qof kaa itaal yar ayaa kugu taagsan kara-waa mid ka mida mucjisooyinka jaceylka u gaarka ah.

Sida ay iyadu doonayso ayay iigu jees-jeestaa. Marka ay rabto taleefanka way iga qabataa. Marka ay doonto waa ay igu damisaa. Marka ay doonto way igu dhageysataa. Marka ay doonto way iga aamustaa. Haddii hadalka wanaagsani sadaqo yahay, anigu maalmahaas hadalkeeda wanaagsan waan ka gadan lahaa; lacagta uu doonaba ha joogo e. Qushi!! Anaa dhibkaas oo dhan isugu wacan. Wax aanan dhigin ma dhicin.

Sheekadeedii macaanayd yaa mar uun iisoo celiya! Sheekh baan ka maqlay: "Nimcada aad haysato waxaad dareentaa marka aad waydo." Maanta ayaan dareemayaa qiimaha ay agteyda ka leedahay sheekada Najma. Sheekadii gabbalku marka uu dhaco ilaa waagu marka uu beryo aannu isku habi jirnay. Sheekadii aan dhammaadka laheyn. Sheekadii aan xanaaqa iyo buuqa ka madhnayd.

Immika laba kelmadood marka aan waydiiyo way xanaaqdaa, waaba haddii ay taleefanka iga qabato e. Mararka qaar taleefan aysan iiga jawaabeyn ayaan wicitaankiisa nafta ku maaweeliyaa. Mar unbay kaa qaban doontaa ayaan niyadda ku sasabaa.

Telegram @SOMALIBOOKS

Maalinba maalinta kasii danbaysa way i sii fogaynaysaa. Maalintii danbe waxaan wacay gabadhii aanu qaraabada aheyn ee iisoo dirtay simikaarka. Cabasho ayaan u gudbistay. Oo tolow maxaan ugu cabanayaa? Ma xafiiskii cabashooyinka baa gabadhu? Bal adba! Waxaan uga sheekeeyay sidii aannu gabadha isku aheyn iyo immika sida aanu isku nahay. Waxaan ka dalbaday inay wax ila qabato oo ay gabadha iga maslaxdo. Sidoo kale ay gabadha kasoo wareysato waxa is beddelay iyo waxa ku dhacay intaba.

Gabadhan iyo Najma iyaguna waa xidid oo way isku fiicanyihiin. Ninkeeda ayay qaraabo yihiin. Codsigaygii ayay fulisay. Gabadhii way soo maslaxday. Najmadaydu iyada oo gabadha ixiraamaysa ayay isoo wacday. Aad ayaan u farxay. Markii aan yara farxay ee ay xoogaa ila hadashay ayay taleefankii jartay. Cabbaar kaddib ayaan taleefanka ku celiyay. Way igu damisay. Muddo ayaan ku cel-celiyay, jawaab haba sheegin! Botonka C-da ayay caadeysatay. Ciil badanaa!!

Immika ayuu noloshayda mugdi hor leh u bidhaamay. Waan nafisi lahaa haddii ay mar uun taleefanka iga qaban laheyd. Rajadeydii aan naawilayay ayaa god dheer ku dhacday. Oomatadii ayaan ka go'ay. Ehelkii, asxaabtii iyo qoyskii oo dhan ayaa warkeyga ogaaday. Waxaa la isku wada sheegay inaan gabadh Burco joogta aad u jeclahay. Sheekaa la iga dhigtay taxane ah, ma se jiro qof dhibaatada i haysata wax igala qabta. Qof kastaa wuu ila

Telegram @SOMALIBOOKS

yaabaa, arrinkaygana dhalanteed ayay u arkaan.

Bannaanka uma baxo, sababtoo ah iyada ayaan ka fikirayaa. Galabtaas waxaan aaday suuqa waxaana soo gatay buug ka sheekaynaya qiso jaceyl ah oo layaab leh. Jaradiinka bannaanka ah ee guriga hortiisa ah ayaan fadhiistay kaddibna buuggii yaraa ayaan durba akhriskiisa dhammeeyay. Qisadii buugga ku qornayd ayaa sii holcisay dabkii ka baxayay qalbigayga. Qolkeyga ayaan dib ugu laabtay. Fikirkii iyo murugadii ayaan halkayga kasii watay. Joodarigaygii wehelka ii ahaa ayaan dhinaca saaray. Heeso qaraam ah oo uu saaranyahay laxan murugo xambaarsani ayaan daartay. Kolka aad murugaysantahay laxanka erayada ayaa dhadhan leh, muusiggu micno ma lahan. Waa kii Frank Ocean yidhi: "kolka aad faraxsantahay muusigga ayaad ku raaxeysataa, balse kolka aad murugaysantahay laxanka ayaad fahantaa."

Waxaa la gaadhay xilligii aan ku laaban lahaa degmadayda. Fasixii ayaa iigu dhammaaday guulddarro ay hadimada caashaqu i badday. Najma waxay ku adkeysatay inay taleefanka mar kasta igu jarto. Aniguna weli kama aanan quusan. Ma jirto waddo kale oo ii bannaan. Kaliya waxaan awoodaa in aanan rajo dhigin.

Degmadaydii ayaan ku laabtay aniga oo tabcaan ah. Waxbarashadeyda ayaan iska sii watay. Waxaan ku jiraa aqalka 10aad ee dugsiga sare[Form Two]. Sannad

Telegram @SOMALIBOOKS

dugsiyeedkii ayaan dhammeystay. Waxaa la gaadhay xilligii aan fasaxa weyn bixi jiray. Sannadkan ma aanan aadin Hargeysa. Taas beddelkeeda waxaan aaday Jigjiga, sababtoo ah halkaas ayaan waxbarashadayda kasii wadan doonaa sannadaha soo socda.

Jigjiga ayaan u guryo beddeshay. Muddo kaddib ayaan gabadhii raadiyay. Si walba oo aan taleefankeeda ku heli karay ayaan isku howlay. Akhyaar kala duwan oo Burco joogta ayaan la xidhiidhay. Nasiibwanaag, markii aan muddo raadinayay ayaan soo helay taleefanka ay sidato. Hargaysa ayaan aaday, mar kale iyo fasax kale. Inaan dib u xidhiidhiyo ayaan billaabay. Sidii joogtada aheyd ee markii aanu is barannay aan u xidhiidhin jiray ayaan u xidhiidhiyay. Mar labaad sheekadu way isugu kaaya duba dhacday, iyaduna si wanaagsan ayay iila macaamishay. Jaceylkii ayaa soo laba kacleeyay. Laba qalbi oo is oggolaa ayaa iskusoo dhawaaday mar kale.

Muddo ayaannu wada xidhiidhi jirnay. Sidii ay sheekadeennu billowgii hore aheyd oo kale ayaanu isku noqonnay. Aad baannu iskugu qanacsaneyn. Qalbigayga ayay degtay. Niyad jabkii iyo dhibaatadii aan soo maray ayaan kasoo kabtay. Waan qalbi doogsaday.

Waxay ii sheegtay inay hooyadeed dalka Norway joogto. Sidoo kalena ay iyada u qalqaalin doonto qorshe dhoof ah. Addis Abeba inay bilaha soo socda aadi doonto ayay iiga war bixisay. Waxaan u sheegay in qorshahaasi caadi

Telegram @SOMALIBOOKS

yahay oo aanaan is waayi doonin isla markaana aanu soo wada xiriiri doono, si kasta oo waayuhu u adkaado. Qalbiga waan ka urugoonayaa, sababtoo ah Najma ayaa iga dhoofaysa. Najma dhoofkeedu wuxuu iiga dhignaan doonaa fallaadh qeyb wadnaha kamid ah la igaga dhuftay. Laakiin iyada ayaan farxadeeda la qaybsanayaa, sababtoo ah, waxay jeceshahay qurbaha. Niyadda ayaan u dhisay. Maalmo ayaannu sheekadeennii wanaagsaneyd ku naaloonay. Dhago codkeeda u buseelay ayaa daxalkii ka maydhmay. Annaga oo isku faraxsan ayay musiibo kale dhacday!

Noloshu marnaba ma dhammeys tirna. Marka ay wax kuu hagaagaan ba wax kale ayaa kaa xumaada. Waxaa iga lumay taleefankaygii. Simikaarkii ayaan sidaas ku waayay. Lambarkeedii oo aan markii horeba helitaankiisa dhibaato u maray ayaan mar kale waayay. Ma aqaano iyadana inuu ka lumay, inay beddeshay iyo inay wax kale ku dhaceen ba. Waxaan waayay meel aan kala xidhiidho iyo si aan ula xidhiidho. Hadda Simikaarkii Najma iyo taleefankaygiiba way isla lumeen. Simikaarkii barashadeeda sababta u noqday wuu ku daayay! Taasi waxey iila micno tahay 'aniga qeyb iga mid ah oo luntay'.

Bilo ayaa kasoo wareegay intii aan bilaa taleefanka ahaa. Najma Intii aannu kala maqneyn ayay Burco iskaga tagtay. Anigu ma aanan ogeyn inay iyadu Burco ka tagtay. Waan raadiyay. Warkeeda ayaan waayay. Si kasta oo aan warkeeda ku raadin karayay ayaan ku raadiyay laakiin

Telegram @SOMALIBOOKS

nasiib xumo waan ku guul daraystay inaan meel aan kala xidhiidho helo.

Bilo rafaad ah kaddib, ugu danbeyn gabadh reer Burco ah oo Amuun la dhaho iyadana ay saaxiibbo ahaan jireen ayaan taleefankeeda helay. Gabadhii ayaan la xidhiidhay. Waxay ii sheegtay Najma inaysan Burco muddo ba joogin isla markaana dhimasho iyo nolol xaalad ay ku sugantahay ayna iyadu ogeyn. Markii aan gabadha warkeeda waayay ayaan iska samray laakiin qalbigayga hal maalin kama aysan bixin.

Magaaladii aan waxbarashada ka watay ayaan iskaga laabtay. Intii aan Jigjiga ku sugnaa gabdho kale ayaan bartay. Sheekooyin kale ayaan iska billaabay. Walow aan gabdho kale xidhiidh la wadaagay, haddana mar kastaba Najma xasuusteeda ayaa qalbiga ku qorneyd. Iyada xasuusteeda ayaan la noolaa.

Isla xilligaas Najma waxay joogtay caasimadda dalka Itoobiya ee Addis Abeba oo uu qorshaha dhoofkeedu uga socday; anigu se ma aanan ogeyn. Haddii aan ogaan lahaa waxaa ii fududaan lahayd inaan la xidhiidho maadaama aan Jigjiga joogay. Duruufuhu way adkaayeen. Dhaqaale buuran ma aanan haysan. Sidaas darteed, raadinta Najma kharash badan oo aan ku bixiyo ma heli karin. Jaceylku se ma yaqaanno duruufta. Marar badan ayaan iswaydiiyaa ma adaa khaldan mise jaceylka? Maskax daashay baa iigu jawaabta, "Maya ee wakhtiga ayaa khaldan!" Jaceylka

Telegram @SOMALIBOOKS

iyo duruufta waxaa ka dhexeeya saami-gal quman.

Haddii duruufta igu xeeran aysan jirin, Najma waan la xidhiidhi lahaa. Xogteeda oo dhan baan ogaan lahaa. Xilliga ay tagayso Addis Abeba waan ka war hayn lahaa.

Ma ogi inay wayday meel ay iyadu igala soo xidhiidho iyo in kale. Waxaan se ogahay in dhinaceeda aanan ka helin wax xidhiidh ah oo danbe. Dib baan ka ogaaday; qorshihii dhoofkeeda ayaa u hir galay. Sannado dhowr ah kadibna waxay ka degtay caasimadda dalka Norway ee Oslo. Sannad kaddib, anigu waxaan ka degay caasimadda dalka Isu Tagga Imaaraadka Carabta ee Dubai oo aan illaa iyo haatan ku noolahay. Halkaas ayaan ka shaqeysanayay. Iyaduna halkeeda ayay wax ku baranaysay.

Nasiibwanaag, wakhtiyadan danbe waxaa la gaadhay xilli ay teknoolajiyaddu heer sare gaadhay isla markaana dadku si dhib yar isku helaan. Waxaan isku taxalujiyay inaan Facebook magaceeda ku raadiyo. Waxaa dhacday inaan facebook ku darsado gabadh kasta oo magaceeda uu ugu qoranyahay Najma. Waxaan raadiyay oo ku darsaday boqolaal Najma oo kala duwan:- Najma Qaali, Najma Qalanjo, Najma Sagal, Najma Dheeman, Najma Hebel....I.w.m.

Qof kasta oo Najma ugu qorantahay waan ku darsan jiray. Wax baa igu lahaa mid unbaa iyada noqon doonta. Najma

Telegram @SOMALIBOOKS

kasta waan salaami jiray isla markaana wareysan jiray. Waxaan uga dan lahaa bal in ay ii suurto gasho helitaanka Najmadaydii. Qalbi wax jecel ma quusto. Maalin iyo habeen waxaan la noolaa xasuusta Najma. Saacad kaliya niyadayda kama aysan bixin. Sannado ayaan howshaas raadinta ah ku jiray. Waxaan aaminsanahay hadda waxaa i baratay gabadh kasta oo Facebook kusoo gasha magaca "Najma".

Sida aan u raadinayo si la mid ah ayay Najma ii raadinaysay, anigu se ma aanan ogeyn. Shan sano iyo dheeraad ayaa kasoo wareegtay maalintii codkeeda iigu danbaysay. Illaa iyo haatana war iyo wacaal ma aanaan kala helin. Gabadha aanu sidaas isku raadinayno maalintii aanu isbaranay illaa iyo maanta ma aanaan hal mar kulmin!

Iyadu nolol kelinnimo ay dareemayso ayay ku nooshahay, balse xasuusahayga ayay sidoo kale la nooshahay. Anigana xaalkeygu sidaas kama duwanayn. Waanu isku baahanahay oo isku boholyownay.

Goor galab ah, bishii July ee sannadkii 2017-kii ayay gabadh aanan aqoonin ciwaankeyga igusoo darsatay. Waan ka aqbalay markaas. Anigu dan gaar ah kama laheyn aqbalaadeeda. Balse arrin yaab leh ayaa dhacay! Marnaba ma aanan filayn inay Najma tahay, magaceeduna uguma qornayn ciwaanka. Way i salaantay. Salaan kadib waxay igu tidhi, "Walaal, Samatar Ibraahim

Telegram @SOMALIBOOKS

ma tahay?"

Waxaan ugu jawaabay, "Haa walaal, Waan ahay". Waxay igu gaaday su'aal kale oo aheyd, "Walaal cid ma kaa maqantahay?".

Intaas markii aanu is dhaafsanay ayuu dareen i galay. Waxaan is waydiiyay gabadha su'aasha ceynkaas ah ku waydiinaysaa yay noqon kartaa? Isla markiina qeybta xasuus dhowrka ee maskaxda ayaa sawirkii Najma ee kaydka ku xardhanaa soo saartay. Xoogaa ayaan fikiray.

Waxaan ugu jawaabay, "Haa walaal. Hal qof ayaa iga maqan, halkaa qofna lagama yaabo inaan dib danbe u helo". Kelmaddaas markaan u celiyay ayay iigu jawaabtay, "Qofkaas kaa maqan muxuu yahay?"

Waxaan ugu jawaabay, "Qofkaas iga maqan waxaa la ii sheegay inay dhimatay". "Yaa kugu yidhi way dhimatay", ayay lasoo booday. Waxaan ugu war celiyay, "Gabadh reer Burco ah". Intaas markii aanu is dhaafsanay ayay igu tidhi, "Waayahay walaal afur baan samaynayaa ee aan goor dhow kulasoo hadlo".

Intaas kadib waxaan ka fikiray gabadhani cida ay tahay! Waxaa halkaas iiga cadaatay inay Najma tahay. Sababtoo ah qof aan Najma aheyn ima uusan waydiiyeen su'aalaha ceynkaas ah. Markii aan fekeray kaddib ayaan iswaydiiyay su'aalo ,"haddii ay Najma tahay maxaad

Telegram @SOMALIBOOKS

sameyn doontaa? Xidhiidhka ma lasii wadi doontaa mise waad ka gaabsan doontaa?"

Waxaan tiigsaday intii ay afurka sameynaysay. Sidii aan filayay ba afurkii kaddib ayay ila soo hadashay. Waxay ii sheegtay inay Najma tahay. Waxaan ku idhi, "taasi ma dhici karto! Maxaad ku caddeynaysaa inaad Najma tahay?"

Waxay tidhi, "Wax kasta oo aad u baahantahay ayaan ku caddeynayaa". Intaas kadib ayaan su'aalo ku imtixaamay. Waxaan waydiiyay arrimo la xidhiidha xidhiidhkii muddada toddobada sano aheyd aanu wadaagnay. Halkii uu ka billowday, halkii uu noo joogay markii isugu kaaya danbaysay iyo weliba su'aalo kale oo muhiim ahaa. Dhammaan su'aalihii ayay iiga jawaabtay. Waxaan xaqiiqsaday qofka ila hadlayaa inay Najma tahay.

Weli waxaan hayaa sawirkii ay Burco iiga soo dirtay toddoba sano ka hor. Waxaan ku idhi, "Najma, waxaan hayaa sawir aad leedahay. Haddii aad Najma tahay sawirkaaga iisoo dir". Waxay iisoo dirtay sawirkeeda. Waxaa anfariir igu noqotay in sawirka aan hayo iyo kan ay iisoo dirtay ay kaaf iyo kala dheeri noqdeen. Waa laba qof oo aan inyar xataa iska shabihin. Waa laba qof oo aad u kala duwan.

Toddoba sannadood ka hor sawirkii maskaxdeyda ku xardhanaa iyo sawirkan ay maanta iisoo dirtay ayaa isku

Telegram @SOMALIBOOKS

mid ah. Waa mucjiso aniga qudhaydu aan rumaysan waayay. Maxaa sawirkan aniga oo aana arkin maskaxdeyda ku sawiray? Yaa maskaxdeyda u sheegay inay Najma suuradan leedahay? Hadda ayaan arkayaa Najmadii aan ka quusan waayay ee aan jeclaa.

Waxaan waydiiyay halka ay ku nooshahay. Waxay ii sheegtay inay Addis Abeba joogto. Waxaan ka codsaday inay taleefankeeda iisoo qorto. Haddana mar kale ayay ii sheegtay inay iska kaftamayso oo aysan Addis Abeba joogin laakiin ay ku nooshahay dalka Norway. Anigana waxay i waydiisay halka aan joogo. Waxaan u sheegay inaan magaalada Jigjiga ku noolahay. Been baan u sheegay, sababtoo ah waxaan tijaabinayay inay anoo dalka jooga isoo xidhiidhin laheyd iyo in kale. Sababta aan beenta u sheegay ayaa aheyd: in gabdhuhu inta badan ay qurbaha jecelyihiin oo aanay la xidhiidhin wiilasha dalka jooga.

Muddo bil ah ayaannu gabadhii si wanaagsan u sheekaysanay. Kaddib waxaan gabadhii ku idhi, "Walaal waxaan doonayaa inaan is guursano. Adiga dartaa ayaan wax badan u dayacay. Muddo dheer ayaan ku baadi goobayay. Muddo dheer ayaan ku sugayay. Muddo dheer ayaan ku jeclaa. Ma rabo wakhti intaas ka badan inuu innaga lumo. Aynu is guursano".

Waxey tidhi, "Waa si wanaagsan, waan oggolahay. Waxaad i sugtaa toddoba bilood. Sannadka 2018-ka bisha

Telegram @SOMALIBOOKS

koowaad ayaan sharciga qaadanayaa. Markaa intaas ii dul qaado"

Waxaan ugu jawaabay, "I'm sorry! Iga raali noqo. Waxaan doonayaa inaan hadda ku guursado. Wakhti intaas ka badan kuma sugi karo".

Waxey tidhi, "Waad iska kaftamaysaa". "Waa iga dhab" ayaan ugu war celiyay. Waxay tidhi, "Jaalle aniga ayaa kugu qanacsan. Aniga ayaa ku raba. Aniga ayaa oggol inaynu is guursanno ee wax yar sug".

Walow aan ka biyo diidsanaa inaan guurka dib u dhigo, haddana maalmahaas kaddib Najma way is yara beddeshay. Waxaan fahmi waayay sababta ay sidaas isugu beddeshay. Waxaa iga dhab aheyd inaan guursado. Ma rabo inaan wakhti kale jaceyl aan midho dhal aheyn ku lumiyo. Waxaan ka shakiyay inay nin leedahay. Waxey billowday inay taleefanka iga qaban waydo.

Dareen baa i galay. Marka aan waydiiyo maxaad taleefanka iiga qaban la'dahay, waxey ku jawaabtaa, "Hooyo ayaa ila joogta, jaamacadda ayaan joogaa, iwm". Taasi aniga iima cuntamin. Iyada kama aanan filayn inay mar kale sidaas sameyso. Horay ayay ii silcisay. Intii ay Burco joogtay ee ay i saniftay ayaa dhibaato iigu filneyd. Maanta ma awoodo inaan maro dhibaato kale.

Waxaan is waydiiyay, "Najma miyay ku maaweelinaysaa

Telegram @SOMALIBOOKS

mise wakhtiga ayay kaa dilaysaa?"

Maskaxdayda ayaan xog-wareystay. "Uma baahnid inaad gabadhan mar danbe u barooratid" ayay maskaxdaydu iigu jawaabtay. Laakiin wadnaha[qalbiga] ayaa jawaabtaas iga diidan. Sideen yeelaa? Waa inaan iska dhaadhiciyo in aanan Najma u baahneyn. Sabab? Sababtoo ah iima ahan sidii hore.

Hadda waxa kaliya ee aan Najma ka rabay ayaa aheyd inaan aqal dhisno iyaduna ay tidhaahdo aqbal iyo guddoon. Mar kale inaan xidhiidh sii daba dheeraada sii wado waxay igu noqonaysaa mashruuc kale. Waa mashruuca biyo xidheenkii Itoobiya ee "Abaay" oo toban sano socda. Xidhiidhkeenu inuu toban sano jirsado wax yar baa ka hadhay.

Markii aan Najma falaadkeeda danbe fahmi waayay ayaan fikiray. Waxaan go'aansaday inaan gabadh kaleba iska guursado, si ugu yaraan aan uga nasto jaceylkan i jilciyay. Inay Najma iga meeraysanayso markaan arkay ayaan nafta runta u sheegay.

Xilligaas anigana waxa i gubaya ayaa ahaa in Xaaskeyga hadda aan qabo uu xiriir meel fiican marayaa noo socday. Soo laabashada Najma waxay kusoo beegantay xilli aan gabadhan kale xidhiidh wanaagsan la lahaa. Waxaa iga go'neyd inaan isla maalmahaas guursado. Najma hadalkeedii dheg uma aanan dhigin.

Telegram @SOMALIBOOKS

Hargaysa ayaan aaday. Maalmo kaddibna waxaanu heshiinay Marwadeyda aanu hadda wada joogno. Sidii ayaan ku guursaday. Walow aan Najma jeclaaday, haddana igama aysan hor istaagin inaan dhisto nolol kale oo farxad leh.

Duruusta aan nolosha ka bartay ayaa ah inaan shakhsi la'aantiis farxad sameysan karo, shakhsi la'aantiisna nolol sameysan karo. Wax kastaba hal shakhsi kuma xirna. Haddii aan intaas oo dhan ogahay waxaan adkeysan lahaa maalmihii aan Najma u barooran jiray. Maalmihii mugdiga ahaa ee aan Najma darteed u dhibtooday, maalmihii ay igu dheel-dheeli jirtay ee anna aan bastey ahaa.

Hadda waxaan ka bogsaday boogtii jaceylka. Waxaan ogaaday inaan Najma kale sameysan karo. Taas ayaa muujinaysa inaan dhanka caqliga ka qaan gaadhay. Nolol cusub ayaan galay. Alxamdulillaah, aad ayaan hadda ugu qanacsanahay noloshayda. Farxad iyo reynreyn ayaannu ku noolnahay aniga iyo oorideyda sharfan.

Waxaa dhacday Najma inay hambalyada arooskayga Facebook ka aragto. Waxay iisoo qortay fariin u qornayd sida tan, "Samataroow caawa dhinacayga waad ka dhimatay. Maadaama aad guursatay, caawa ayaa isugu keen danbaysa"

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxaan ugu jawaabay, "Waa si wanaagsan walaal. Anigu nolol baan billowday adigana nolol aad if iyo aakhira ba ku liibaanto ayaan kuu rajeynayaa"

Waxey i galisay 'block'. Way i xayirtay. Bilo kadib ayay xayiraaddii iga qaaday. Waanu wada xidhiidhnay. Mar danbe ayuu xidhiidhkeenu wanaagsanaaday. Ma aqaanno wax ay igu akhriso, laakiin mar kasta oo aan Najma la xidhiidho si baan u nugulahay.

Hadda muddo dhowr bilood laga joogo, aniga oo xaas leh ayay isoo xidhiidhisay. Anigana Jaceylkii hore ayaa igu duxay oo waan soo dhaweeyay. Waxey tidhi, "Jaalle waxaan doonayaa inaynu is-guursano. Laakiin waxaa jira hal shardi: Xaaskaaga waa inaad furtaa!

Madaxa ayaa i waynaaday. Gabadha aan dhawaantan guursaday miyaan furaa? Ma dhici karto. Oo maxaan Gabadha islaameed usoo luggooyay haddii aanan farxad dhameystiran siin karin? Maskaxdeyda ayaan dib u howl galiyay. Fikir dheer ayaan galay. Waxaa iisoo baxday inaana xaaskeyga furi karin. Sidoo kalena aan Najma xiisaynayo.

Maxaa talo ah? Waxaan Najma usoo bandhigay inaan guursado anoo xaaskayga qaba. Nasiib uma aysan yeelan Najma inay xaaskeyga koowaad noqoto, laakiin waa ay noqon kartaa xaaskeyga labaad. Arrinta ah inaan labo xaas guursado shakhsiyan ma aanan jeclayn. Laakiin

Telegram @SOMALIBOOKS

jaceylkii hore ee Najma ayaan xus uga dhigayaa. Iyadu se ma oggola.

Waxey igusii adkeysay codsigii ahaa, "Inaan xaaskeyga sharfan furo". Go'aankeygii ayaan ku adkeystay. Xaaskeyga ma furi doono. Waxaan ku idhi, "laba mid soo gal-Inaad iska raadsato calafkaaga iyo inaad xaaskeyga labaad noqoto. Waana ku jeclahay oo waa iga dhab".

Ugu danbeyn arintaas Najma ma aysan aqbalin. Aniguna teeda ma aanan aqbalin. Goortii aanan xaas laheyn ayay guurka ka war-wareegtay, maanta oo aan xaasle ahayna waxa ay doonaysaa inaan guursado! Qalbigaan iska dhahay, "Tolow ma nin baa qabay oo ay hadda iska furtay? Maxay se markii hore u diidanayd. Maxey markaad wacdo wicitaanka kuugu dhageysan jirtay?"

Hadda weli xidhiidh aana toos aheyn ayaanu leenahay. Waaa macquul in wax danbe kasoo cusboonaadaan. Eebbe khayr ha ka dhigo. Nabad iyo warsan.

Telegram @SOMALIBOOKS

DHAMMAAD

Sheekadani waa mid dhab u dhacday oo socotay muddo 7 sannadood ah. Samatar hadda wuxuu ku noolyahay dalka Isu-tagga Imaaraadka Carabta, halka ay Najma weli ku nooshahay dalka Norway. Isaga iyo ooridiisu waxay dhaleen hal wiil. Dhinaca kalena Najma weli ma aysan guursanin. Magacyada "Samatar" iyo "Najma" ma ahan kuwooda dhabta ah, balse cudur-daar wiilka iiga yimid darteed ayaan u qariyay magacyada dhabta ah ee lammaanaha. Sidaas si lamid ah dhammaan magacyada qisada ku jiraa ma ahan kuwii dhabta ahaa ee dadka ku xusan sababtoo ah, waxaan u dan lahaa uun inaan ujeeddada qisada tabiyo ee magacyadu muhiim inooma aha. Qisadan waxaan idiinla wadaagay in aynu ka baranno duruus. Maalin kasta waxaa macquul ah inaynu sameyno xidhiidho. Xidhiidhadaas badankooda way fashilmaan. Qof kasta ugu yaraan dhowr xidhiidh ayuu maraa inta uusan guursan ka hor. Ma ogin qofka aynu xidhiidhka guurka la wadaagi doono. Ballamo ayaynu qaadnaa, inta badanna ma oofino ballamahaas. Inaynu isla wadaagno qisooyin iyo sheekooyin dhab u dhacay waxey inoo faa'iidaysaa waayo aragnimo. Hadda waa inaynu duruus ka baranno xaaladaha ay isla mareen Samatar iyo Najma.

Wixii talo ah ee aad aniga ii hayso ama se aad u hayso Samatar iyo Najma, fadlan halkan noogu reeb

Telegram @SOMALIBOOKS

[mustafeatam@gmail.com], waxaa hubaal ah inaanu akhrisan doono haddii Eebbe wayne idmo. Haddii aad haysid qiso cajiib ah oo mudan in la qoro, fadlan ilasoo xidhiidh. Mahadsanid.

Mustafa Atam.

Telegram @SOMALIBOOKS